Ilaalin la xoojiyay oo loogu talagalay reer Alberta ee daryeelka hela

Nofeembar 4, 2026

Sharciga la soo jeediyay, haddii la ansixiyo, wuxuu xoojin doonaa ilaalinta reer Alberta ee helaya daryeelka, wuxuu hagaajin doonaa la-xisaabtanka, wuxuuna taageeri doonaa faragelinta naxariista leh.

Hindise-sharciyeedka 39, *Xeerka Wax-ka-beddelka Sharciyada Caafimaadka, 2026 (Lambarka 2)* (*Health Statutes Amendment Act, 2026 (No. 2)*), wuxuu mudnaanta koowaad siin doonaa badbaadada, sharafta iyo fayoqabka reer Alberta ee helaya daryeelka, iyadoo la xoojinayo ilaalinta iyo la-xisaabtanka ee goobaha daryeelka ee lagu maalgeliyo lacagta dadweynaha. Wax-ka-beddellada la soo jeediyay waxay sidoo kale ilaalin doonaan helitaanka adeegyada shaybaarka ee uu daboolo caymiska dadweynaha, waxay casriyeyn doonaan sharciyada caafimaadka, waxayna taageeri doonaan xasilloonida iyo daahfurnaanta guud ahaan nidaamka caafimaadka Alberta.

“Marka reer Alberta ay ku jiraan xaaladda ugu nugul, waa inay ku tiirsanaan karaan daryeel badbaado leh oo sharaf leh. Isbeddelladan la soo jeediyay waxay xoojin doonaan ilaalinta, waxay adkayn doonaan la-xisaabtanka, waxayna qoysaska siin doonaan kalsooni weyn oo ah in dadka ay jecel yihiin la ilaalinayo.”
Justin Wright, Wasiirka Adeegyada Caafimaadka Aasaasiga ah iyo Ka-hortagga

Xoojinta ilaalinta reer Alberta ee helaya daryeelka
Wax-ka-beddellada la soo jeediyay ee *Xeerka Ilaalinta Dadka Daryeelka ku jira* (*Protection for Persons in Care Act*) waxay caddayn doonaan bixiyeyaasha daryeelka iyo taageerada ee lagu maalgeliyo lacagta dadweynaha ee uu xeerku khuseeyo, waxayna hagaajin doonaan hababka baaritaanka warbixinnada xadgudubka, racfaannada, u hoggaansanaanta iyo dhaqangelinta. Isbeddelladani waxay gacan ka geysan doonaan hubinta in walaacyada ku saabsan xadgudubka si habboon loo baaro oo wax looga qabto, taas oo siinaysa reer Alberta iyo qoysaskooda kalsooni weyn oo ah in dadka helaya daryeelka loola dhaqmo sharaf iyo ixtiraam. Ilaalinta iyo xuquuqda racfaanka ee hadda jira way sii jiri doonaan.

Hagaajinta daryeelka reer Alberta ee nugul
Faragelinta naxariista leh waa hab lagu sameeyay Alberta oo looga gol leeyahay in dadka qaba noocyada ugu daran ee balwadda la caawiyo si ay u helaan daryeelka ay u baahan yihiin. Iyadoo la raacayo *Xeerka Faragelinta Naxariista leh* (*Compassionate Intervention Act*), xubnaha qoyska, mas’uuliyiinta sharci ahaan loo magacaabay (guardians), xirfadleyda daryeelka caafimaadka, booliska ama saraakiisha nabadgelyada waxay codsan karaan amar qiimeyn, iyadoo ah tallaabada ugu dambaysa, oo loogu talagalay qof ay balwaddiisu ka dhigtay mid khatar ku ah naftiisa ama dadka kale. Wax-ka-beddellada la soo jeediyay ee xeerka waxay xoojin doonaan hababka codsiga iyo

dhegeysiga, waxay taageeri doonaan helitaanka macluumaadka waqtiga ku habboon, waxay bixin doonaan dabacsanaan dheeraad ah oo dhinaca daryeelka caafimaadka ah, waxayna caddayn doonaan kormeerka, iyadoo la hubinayo in ilaalinta jirta ay sii jirto. Isbeddelladani waxay gacan ka geysan doonaan hubinta in faragelinta naxariista leh loo fuliyo si badbaado leh, waxtar leh oo joogto ah, marka la hirgeliyo guga 2027.

Wax-ka-beddellada la soo jeediyay ee *Xeerka Caafimaadka Maskaxda* (*Mental Health Act*) waxay xoojin doonaan isku-duwidda qaybaha adeegyada caafimaadka ee ku dhex jira isbitaallada la oggolaaday, iyagoo gacan ka geysanaya hubinta in bukaannadu helaan daryeelka ay u baahan yihiin, iyadoo la ilaalinayo xuquuqda bukaannada iyo dammaanadaha ilaalintooda.

“Waxaan xoojinaynaa daryeelka reer Alberta ee la halgamaya balwad daran ama isticmaalka maandooriyaha. Isbeddelladani waxay naga caawinayaan inaan fulino ballanqaadkayaga ah hirgelinta faragelinta naxariista leh, si reer Alberta ee qaba balwadda ugu daran ay u helaan daaweyn badbaado leh, isku-duwan oo joogto ah oo ka caawisa inay u gudbaan soo kabasho.”
Rick Wilson, Wasiirka Caafimaadka Maskaxda iyo Balwadda

Caddaynta maalgelinta dadweynaha ee adeegyada shaybaarka
Dowladda Alberta waxay si adag ugu sii go’an tahay nidaam daryeel caafimaad oo xooggan oo lagu maalgeliyo lacagta dadweynaha, kaas oo bukaannada mudnaanta siiya, bixiya doorashooyin badan, isla markaana hubiya in adeegyada shaybaarka ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ay sii ahaadaan kuwo lagu maalgeliyo lacagta dadweynaha. Wax-ka-beddellada la soo jeediyay ee *Xeerka Caymiska Daryeelka Caafimaadka Alberta* (*Alberta Health Care Insurance Act*, AHCIA) waxay sii hayn doonaan helitaanka bilaashka ah ee adeegyada shaybaarka bulshada ee lagu maalgeliyo lacagta dadweynaha ee daryeelka caymiska leh iyo daryeelka uu dhakhtar u gudbiyay, iyadoo la hubinayo in rugaha caafimaadka gaarka loo leeyahay ay mas’uul ka yihiin bixinta kharashyada shaybaarka ee la xiriira adeegyada aan caymiska lahayn.

Dejinta shuruudaha qorshayaasha is-caymiska
Wax-ka-beddello dheeraad ah oo lagu sameeyo AHCIA waxay dowladda siin doonaan awoodaha sharciyeed ee nidaaminta ee loo baahan yahay si loola socdo habaynta is-caymiska ee dadka doorta inay daryeel caafimaad oo qorshaysan oo aan degdeg ahayn ka helaan meel ka baxsan nidaamka dadweynaha. Tan waxaa ka mid ah dejinta shuruudaha diiwaan-haynta iyo warbixin-bixinta ee dhakhaatiirta iyo shirkadaha caymiska ee ka qaybgala. Helitaanka reer Alberta ee daryeelka caafimaadka ee lagu maalgeliyo lacagta dadweynaha siduu yahay ayuu ahaan doonaa, mana jiri doono qof reer Alberta ah oo looga baahdo inuu yeesho is-caymis.

“Isbeddelladani waxay dejinayaan xeerar cad iyo ilaalin xooggan oo loogu talagalay reer Alberta ee doorta inay daryeelka caafimaadka ee qorshaysan ee aan degdegga ahayn ku bixiyaan habaynta is-caymiska. Waxay sidoo kale xoojinayaan kormeerka si loo ilaaliyo nidaamkeenna daryeelka

caafimaadka dadweynaha, iyadoo la hubinayo in helitaanka reer Alberta ee daryeelka lagu maalgeliyo lacagta dadweynaha uusan isbeddelin.”
Adriana LaGrange, Wasiirka Adeegyada Caafimaadka Isbitaallada iyo Qalliinka

Wax-ka-beddello dheeraad ah oo la soo jeediyay waxay cusboonaysiin doonaan *Xeerka Caafimaadka Dadweynaha* (*Public Health Act*), waxayna baabi’in doonaan wax-ka-beddellada duugoobay si loo taageero u wareejinta kormeerayaasha caafimaadka dadweynaha laga soo wareejinayo Alberta Health Services loona wareejinayo Primary Care Alberta.

Macluumaad la xiriira

- Ballaarinta helitaanka daryeelka caafimaadka ee reer Alberta
- Taageeridda nidaam daryeel caafimaad oo heer caalami ah

Weydiimaha Warbaahinta
Jaye Lang
jaye.lang@gov.ab.ca
780 427 3665
Xoghayaha Warfaafinta, Adeegyada Caafimaadka Aasaasiga ah iyo Ka-hortagga